

## War Murtiyeed

### Hordhac

Bisha Maarso 22 -23, 2018 Waxay Dalladda bulshada rayidka ah ee PUNSAA iyo xafiiska difaacaha xaquuqda aadanaha ee Puntland si wadajir ah usoo qaban qaabiyeen shir wadatashi oo uu xafiiska difaacaha xaquuqda aadanuhu kusoo bandhigay warbixin sanadeedki 2016/2017 ee xaaladda xaquuqda aadanaha ee puntland taasoo ahayd warbixin dhamaystiran oo aad looga shaqeeyey dhinacyo badanna taabanaysa.

Waxay ka soo qayb galayaashu is weydaarsadeen doodo iyo fikrado ka hadlaya xaaladda xaquuqda aadanaha ee Puntland waxayna soo ban dhigeen dhacdooyin iyo baahiyo ka jira dhanka xuquuqda aadanaha ee guud ahaan deeganada puntland.

### Dhibaatooyinka jira

Is xogwaraysi kadib waxaa la garwaaqsaday in xaalada xuquuqda aadanaha ee puntland iyo guud ahaan soomaaliya ay tahay mid hoosaysa balse ay jiraan guulo yar yar oo laga gaaray meelaha qaarkood, sida xabsiyada iyadoo la ogaaday in aaney wali dhamaystir ahayn xaalada xaquuqda aadanaha ee xabsiyadu.

Waxaa si gaar ah loo tilmaamay xarumaha saldhigyada boolisku in ay yihiin meelaha ugu daran ee ay kajirto gabood falo ka dhan ah xuquuqda aadanaha sida

1. Saldhigyada booliska qofka lagu soo xiro mudada yar ee uu saldhiga ku jiro waxa quudiya cidii soo dacwaysay magaalooyinka qaarkood
2. Ciriir ka jira xabsiyada qaarkood qolalka maxaabiista
3. fayo dhawrka iyo nadaafada saldhigyada oo hooseeya
4. Edaysanaha oo xirnaada in ka badan inta sharcigu u ogolyahay oo ah 48 saacadood
5. Ciidanka saldhigyada oo usoo xira dadka qaab aan sharci waafaqsanayn.
6. Aqoon iyo Xirfad yari ka jirta ciidanka booliska ka
7. Tacadiyada iyo Shaqaaqooyinka haweenka iyo carruurta oo ah kuwo had iyo jeer soo noqnoqda, intooda badanna lala fakado iyadoon sharciga la horgeyn

Waxaa sidoo kale la tilmaamay qololka dhismayaasha xabsiyada oo tiradoodu yartahay iyo sidoo kale inay jiraan gobolo aan lahayn habayaraatee wax xabsiyo/saldhigyo ah iyo meelo lagu xiro dadka gaysta danbiyada .



*Handwritten signature in blue ink.*

## Si looga gudbo dhibaatooyinkan

Si xal loogu helo dhamaan dhibatooyinka aan kor ku xusnay waxa shirka wada tashigu isla gaaray in dabagal, kormeer iyo korjoogteyn lagu sameeyo dhamaan xarumaha xabsiyada iyo saldhigyada. waxa sidoo kale lagama maar maan ah in la joogteeyo shirkarka noocan ah si loo helo hanaan isku xira bulshada rayid ka ah iyo dhamaan hayadaha daneeya xuquuqda adanaha. Waxa sidoo kale la bogaadiyay doorka fiican ee xafiiska difaacaha xuquuqda aadanaha Puntland iyo dalladda PUNSAA ay mar walba ka qaataan arimahakan waxana loo soo jeediyay dhiiri galin iyo amaan buuxda.

## Talo soo jeedin

- Shirka wada tashigu wuxuu soo jeedinaynaa in dawladu siyaasadaha iyo shuruucda u degsan xabsiyada iyo saldhigyada ay taaba galiso.
- Si gaara waxan u soo jeedinaynaa in wasaaradaha ay khasayso ee puntland ay fuliyaan shuruudaha lagu qaadanayo dhamaan saraakiisha iyo ciidanka ka hawlgalaya saldhigyada iyo xabsiyada si loo yareeyo dhibaatooyinka aan kor ku xusnay.
- In dawladu joogtayso mushahar ku filanna siiso ciidanka ka hawl gala saldhigyada iyo xabsiyada si ay waajibaadkooda ugu gutaan si hufan.
- Ganacsatada, culimada, waxgaradka iyo qaybaha kale ee bulshada gudahaha iyo dibadaba ee puntland waxa uu shirku ku dhiiri galinyaa inay kaalin mugleh ka qaataan dadaalada lagu hormarinayo amniga iyo guud ahaan xuquuqda aadanaha gaar ahaan xaalada saldhigyada iyo xabsiyada puntland.
- dawladu waa inay tixgalisaa fikarka /xorriyadda hadalka sida uu qeexayo dastuurka puntland.
- waa in loomaraa nidaam daahfuran oo hufan habka shaqaalaysiinta shaqaalaha rayidka iyo kuwa aan rayidka ahyn iyadoo latixraacayo xeerka shaqaalaysiinta (law number 5 iyo law number 65).

Dhammaad  
Gudoomiyaha Dallada PUNSAA  
Faysal Axmad Warsame



*Faysal Axmad Warsame*